


Halyeygeygu Waa Adiga

Sida caruurku ula
dagaalami karaan
Fayraska Corona!



IASC
Inter-Agency Standing Committee

Sameynta “Halyeygeygu Waa Adiga”

Buugani wuxuu ahaa mashruuc ay soo saareen Kooxda Tixraaca ee Golaha Dhex-dhexaadka ah ee Tixraaca Caafimaadka Maskaxda iyo Taageerada nafsiyeed ee dejinta xaaladaha Degdeg ah (IASC MHPSS RG). Mashruucan waxaa taageeray khubaro ka howl gasha caalmaka oo idil kana socda Hay’adaha Xubnaha ka ah IASC MHPSS RG, oo ay wehliyaan, waalidiinta, daryeelayaasha, macallimiinta iyo carruurta ku nool 104 waddan. Sahamin caalami ah ayaa lagu qaybiyey Carabi, Ingiriis, Talyaani, Faransiis iyo Isbaanish si loo qiimeeyo caafimaadka maskaxda iyo baahiyaha nafsani-ahaaneed ee carruurta xilliga faafida fayraska corona. Iyadoo la adeegsanaayo natiijada sahminta ayaa waxaa lasoo hindisay moowduucyo loo diyaariyay qaab sheeko. Buugan waxaa lala wadaagey si sheeko ahaan ah caruur wadamo dhawr ah ku nool oo uu saameeyay fayraska corona. Warcelinta kaso baxday caruurta, waalidka iyo daryeelayaasha ayaa loo isticmaaley in dib loo hubiyo lana dameystiro sheekada.

In kabadan 1,700 oo caruur, waalidiin, daryeelayaal iyo macalimiin ka kala yimid daafaha dunida ayaa qaatay waqti si ay noola wadaagaan sida ay ula tacaalayaan xargo gooska fayraska corona. Aad bay u mahadsanyihiin carruurtan, waalidkood, daryeelayaashooda iyo macallimiintooda dhameystirida sahankeena iyo saameynta sheekadan. Tani waa sheeko loo soo diyaariyay oo loogu talagalay carruurta adduunka oo idil.

IASC MHPSS RG wuxuu aqoonsanyahay in Helen Patuck ay si faafaahsan u qortay sheekada buuggan.

©IASC, 2020. Daabacaadan waxaa lagu daabacay hal abuurnimada halbawlaha ah ee marka la eego shuruudaha shatigaan, waad daabacan kartaa, tarjumi kartaa oo aad isticmaali kartaa Shaqadan ujeedooyin aan ganacsi ahayn, haddii shaqada ay si ku habboon u tilmaaman tahay.

Hordhac

“Halyeeygeyga Waa Adiga” waa buug loo qoray carruurta aduunka oo idil ee uu saameeyey cudurka xargo gooska fayrask corona.

“Halyeeygeygu Waa Adiga” waa inuu akhriyaa waalid, daryeele ama macalin ay weheliyaan ilmo ama koox yar oo caruur ah. Laguma dhiirigelin carruurta inay u akhriyaan buuggan si madaxbanaan iyaga oo aan la helin taageero waalid, daryeele ama macallin. Tilmaanta dheeraadka ah ee loo yaqaan “Waxqabadka Halyeeyada” (oo gadaal laga soo daabici doono) waxay bixin doontaa taageero wax looga qabanayo mowduucyada la xiriira fayraska corona, kuwaas oo ka caawini doona carruurta maaraynta dareenka iyo shucuurta, sidoo kale howlo dheeraad ah ee loogu talagalay carruurta inay sameeyaan kuwaas oo lugu saleeyay buuga.

Turjumid

Kooxda Tixraaca lafteeda ayaa isku dubaridi doonta tarjumidda Carabiga, Shiinaha, Faransiiska, Ruushka, iyo Isbaanishka. La xiriir Kooxda Tixraaca IASC ee Caafimaadka Maskaxda iyo Taageero Nafsiyeed (MHPSS) (mhps.refgroup@gmail.com) si aad iskugu dubbaridid tarjumaadaha luqadaha kale. Dhammaan tarjumaadaha la dhammeystiro waxaa la dhigi doonaa websaydka Tixraaca Kooxda IASC.

Haddii aad abuurto tarjumaad ama la-qabsi ku saabsan Shaqadan, si taxaddar leh u ogow sidan:

- Laguuma oggola inaad ku darto sumaddaada (ama Kan hay'adda maalgalinta) sheygan.
- Xaaladda la qabsiga (tusaale ahaan, isbeddelada qoraalka ama sawirrada), isticmaalka astaanta IASC lama oggola. Isticmaal kasta oo shaqadan ah, waa inaysan jirin soo-jeedin in IASC ay u ogolaatay urur gooni ah, alaabooyin ama adeegyo gaar ah.
- Waa inaad Shati u siisaa tarjumaaddaada ama la-qabsigaaga isla sida or udhiganta Creative Commons license. CC BY-NC-SA 4.0 ama 3.0 ayaa la soo jeedinayaa. Kani liiska shatiyada la isticmaali karo: <https://creativecommons.org/share-your-work/licensing-considerations/compatible-licenses>
- Waa inaad ku darto afeefashadan soo socota ee luqadda tarjumaadda “tarjumadan /la-waafajinteeda ma aysan abuurin Guddiga Joogtada ah ee Hay'adda IASC. IASC mas'uul kama ah waxa ku jira ama sax ahaanta tarjumaadda / is waafajinta. Daabacaadda asalka ah ee Ingiriisiga “Guddiga Joogtada ah ee Hay'adda. Halyeeygeygu Waa Adi: Sida Caruurtu ula Dagaallami karto COVID-19 ama fayraska corona! Shatiga CC BY-NC-SA 3.0 IGO wuxuu noqon doonaa mid ansax ah oo daabacaad rasmi ah.”





Sara hooyadeed ayaa halyeygeeda ah sababtoo ah waa hooyada ugu fiican iyo seynisyahanka ugu wanaagsan caalamka. Hase ahaatee, Sara hooyadeed uma heli karto daawo fayraska corona.

“Sidee buu u egyahay fayraska corona?” Sara ayaa hooyadeed weydiisay.

“Fayraska Corona waa wax aad u yar oo anan arki karin” hoyadeed ayaa tiri. “Laakin wuxuu kufidaa qufaca iyo hindhisada dadka jirran, iyo marka ay taabtaan dadka ama sheeyada agagaarkooda ah. Dadka xanuunkan uu ku dhaco waxaa qabta qandho, qufac iyo neefta oo ku dhagi karta.

“Lama dagaalami karno sababtoo ah ma arki karno miyaa? Sara ayaa weydiisay.

“Waan la dagaalami karnaa” Sara hooyadeed ayaa tiri. “Waa sidaas sababta aan u rabo in aad badbaado, Sara.” Fayraskan wuxuu waxyeelayaa dad kala duwan, cid walbana wey naga caawin kartaa in aan la dagaalano. Caruurta waa muhiim, weyna na caawin karaan sidoo kale. Waxaad u baahantahay in aad noo badbaad qabto anakoo dhan. Waxaan kaaga baahane in aad noqoto halyeyyadeyda”.



Sara habeenkaas oo dhan sariirta ayeey saarneed, haba yaraatee ma aysan dareemin in ay tahay halyeeyad. Waxey dareentay xanaaq. Waxey rabtey in ay iskuulka aado, balse iskuulkeedii waa la xirey. Saxiibadeed ayey rabtey in ay aragto laakin ma'aysan aheen ammaan. Sara waxey rabtay in fayraska corona uu dunideedu cabsida ka joojiyo.

“Halyeeyadu waxey leeyihiin awood dheeraad ah” ayay is ku tiri ayada oo indhaheeda sii xireysa si ay u seexato,” “Anigu maxaan heystaa?”

Islamarkiiba waxey maqashey cod dagan oo si hoose oogu dhawaaqaya magaceeda mugdiga dhexdisa.

“Yaa jooga halkan?” ayey hoos u tiri Sara.

“Maxaad u baahantahay si aad u noqotid halyeey, Sara?” codkii ayaa weydiyay.

“Waxaan ubaahnahay hab aan ugu sheego caruuraha dunida oo idil sida ay nafsadooda u ilaaliyaan, una badbaadiyaan cid walba oo kale....” ayey tiri Sara.

“ Aniga maxaad iga baahantahey in aan noqdo?” codkii baa weydiyay.

“Waxaan ubaahnahay wax duula...wax cod weyn leh... iyo wax i caawin kara! ”

Markiiba wax shanqaraya oo cajiib ah ayaa kasoo dhex muuqday iftiinka dayaxa.





“Maxaa tahay adigu?” Sara ayaa si neeftuur ah u tiri.

“Waxaan ahey Ario”, ayuu yiri.

“Weligey ma arkin Ario,” ayay tiri Sara.

“Welibgeyba halkan ayaan joogey,” ayuu yiri Ario. “Wadnahaaga ayaan ka kasoobaxay”.

“Hadii aan adigu ku heysan lahaa...markaa waxaan u sheegi lahaa dhamaan caruurta dunida oo idil wax ku saabsan fayraska corona!” Sara ayaa tiri. “Halyeeyad ayaan noqon karaa! Bal sug, Ario, mala safri karaa iyada oo uu jiro fayraska corona?”

“Aniga oo keliya Sara,” ayuu yiri Ario. “Wax dhib ah kuguma dhici doono inta aan wada joogno.”





Sara waxay kuboodey Ario dhabarkiisa waxeyna kawada bexeen daaqada qolkeeda Jiifka, waxeyna u duuleen cirka. Waxay u duuleen dhanka xidagaha iyagoo salaamay dayaxa.

Marka ay qorraxdu soo baxday, waxey ku dageen meel saxara ah una dhaw ahraamta, halkaasoo ay ku cayaarayeen koox yar oo caruur ah. Caruurti ayaa farxad la buuqay waxeyna u gacan haadiyeen Sara iyo Ario'geeda.

"Soo dhawaada, magaceygu waa Salem!" ayuu ku qeyliyay mid ka mid ah wiilashi. "Maxaad halkan ka heysaan? Waan ka xunahay, idiin'ma soo dhawaan karno, waa in aan ugu yaraan hal mitir idinka fogaano!"

"Taasi waa sababta aan halkan u joogno!" ayey Sara dib oogu tiri. "Magaceygu waa Sara kanina waa Ario. Ma ogtahiin in caruurtu ay ka badbaadin karaan fayraska corona, dariskooda, saxiibadooda, waalidkooda, ayeeyadooda iyo awoowyadooda? Dhamaanteen waxaan ubaahanahay in aan"

"Gacmaheena ku dhaqno biyo iyo saabun!" ayuu yiri Salem isagoo dhoola cadeynaya. "Waan ognahay, Sara. Sidoo kale haddi aan xanunsano waxaan ku qufacnaa xusuladaanada- gacanta ayaan u haadinaa dadka intaan gacansaari laheyn. Waxaan isku dayeynaa in aan guryahaanaga joogno, laakin waxaan dagannahay magaalo dad badan...qof walibana guriga ma joogaayo."

"Hmm, waan ka caawin karaa taas, " Ario ayaa yiri "Ma arki karaan fayraska corona laakiin... anigu wey i arki karaan! Ku soo booda, laakiin fadlan ku fariista labada dhinac ee baalasheyda-waxey isu jiraan ugu yaraan hal mitir



Ario wuxuu u duuley cirka isaga oo ay baalashiisa saranyihiin Salem iyo Sara. Wuxu dulmarey magaalada wuxuuna bilaabay in uu guuxo oona heeso! Salem ayaa u dhawaaqey carruurta wadooyinka marayeen:

“Tagga, una sheega reerhiina, in aan ku badbaadeysaan gudaha! Sida oogu wanaagsan ee aan isku daryeeli karno waan in aan guryaha joognaa!”

Dadku waxey la yaabeen waxa ay arkeen. Wey gacan haadiyeen weyna aqbaleen in ay guryahooda joogaan.





Ario wuxuu kor oogu u booday xagga cirka. Salem farxad buu la qayliyay. Dusha sare ee daruuraha waxa marayay diyaarad, rakaabkiina si cajiib ah ayay iyaga u eegeen.

"Dadku waa inay mardhow joojiyaan safarka, siiba hadda," ayuu yiri Salem.

"Waxay xirayaan xuduudaha adduunka oo dhan, waana inaan dhammaanteen joognaa halka aan joogno lana joogna dadka aan jecel nahay."

"Waxaa la dareemayaa in ay waxyaalo badan is badeleen," Sara ayaa tiri.
"Waan ka baqaa iyada mararka qaar."

"Waxaa ladareemi karaa cabsi iyo jahwareer markay arrimuhu is beddelayaan." Ario ayaa yiri. "Markii aan baqo, tartiib ayaan u neefsadaa-waxaana neefsadaa dab!"

Ario wuxuu neefsadey kubad dab ah oo aad u weyn!

"Sideed isku dejisaa marka aad dareento cabsi?" Ario ayaa iyaga weydiiyey.



“Waxaan jeclahay inaan ka fikiro qof I dareensiya ammaan” Sara ayaa tiri.

“Anigana sidoo kale, waxaan ka fikiraa dhammaan dadka i caawiya sidii aan u dareemi lahaa nabadgelyo, sida ayeeyooyinkega iyo awoowayaashay,” ayuu yiri Salem. “Waan u xiisay. Ma siin karo hab ayaka sababtoo ah waxaan qaadsiin karaa fayraska corona. Anagu badanaa waxaan aragnaa iyaga dhamaadka isbuuc walba, laakiin hadda ma aragno sababtoo ah waa inaan badbaadino ayaga.”

“Ma wici kartaa iyaga?” Saara waxay weydiisay saaxiibkeed. “ Haa!” ayuu yiri Salem. “Wey i soo wacaan maalin kasta, waxaana u sheegaa wax kasta oo aan guriga ku sameyno. Waxaan dareema wanaag, iyagana waxay dareemaan wanaag.”

“Waa caadi in aan seegno dadka aannu jecel nahay oo aan hadda arki Karin.” Ario ayaa yiri “Waxay muujineysaa sida aan u daryeelayno. Miyay kuu fiicnaan lahayd inaad la kulanto geesiyaal kale?”

“Haa fadlan!” Sara iyo Salem ayaa dib oogu dhawaaq celiyay.”

“Hagaag, saaxiibtey Sasha waxay leedahay awood sare oo u gaar ah,” ayuu yiri Ario. “Aan tagno!”





Sidaasay dhulka ugu soo hoobteen kuna soo dageen tuulo yar. Gabadh ayaa banaanka gurigeeda ka muuqaneysay waxeyna gureysay ubax. Way qosashay, markay aragtay Ario iyo carruurtii oo baalashiisa ku dul fadhiya.

“Ario” ayay ku ooyday “Waa in aanu ugu yaraan isku jirnaa hal mitir, sidaa daraadeed hab ayaan hawada kuusoo marinayaa, maxaad dhamaantiin halkan ka heysaan?”

“Waan dareemay habtaada markii aad ii sheegtay sidaa, Sasha.” Ario ayaa yiri. “Waan jeclahay sida aan ugu adeegsan karno ereyada iyo ficiladda si aan u muujino daryeel. Waxaan rabay in saaxiibadeyda ay wax ka bartaan awooddaada dheeraadka ah.”

“Waa maxay awoodeyda dheeraadka ah?” Sasha ayaa tiri.

“Maadaama qof reerkaaga ka mid ah xanuunsadey, Waxaad joogaysay guriga si aad u habsato inaad cid kale la wadaagin fayraska corona,” ayuu yiri Ario.

“Haa, waa aabahey, wuxuuna joogahayay qolkiisa jiifka ah ilaa uu si fiican ooga raysanaayay”, Sasha ayaa tiri.



“Laakiin wax aad u xun ma’ahan! Waan dheelnaa ciyaaro, waan karsanaa, beertaanada xanaanada ayaan waqti ku qaadanaa, si wada jir ah ayaan u wada cunteynaa. Aniga iyo walaalahay waxaan dhelnaa cayaarta suul taabashada iyo qoob ka cayaarka. Waxaan akhrinaa buugaagta, aniga waxaan sii wadan karaa waxbarashada sababtoo ah mararka qaarkood waxaan u xiisay iskuulka. Joogitaanka guriga markii hore waxey ila noqotey wax aanan saxsaneyn, laakiin hadda caadi ayay ila tahey. ”

“Taasi had iyo jeer ma sahlana, Sasha”, ayuu yiri Ario. “Waxaad raadineysaa qaabab aad isku maweeliso oo aad kula socoto kuwa aad jeceshahay ee guriga jooga. Taas ayaa kaa dhigaysa halyeyadeyada!”

“Waligaa ma la dagaashay reerkiina?” Salem ayaa weydiyay.

“Waan is dagaalnaa mararka qaarkood,” ayey tiri Sasha. “Waa inaan dulqaad dheeraad ah muujino, iyo isfahan dheeraad ah, iyo in aan dhahno waan ka xumahey si deg deg ah. Taasi waa awood sare oo sax ah, maxaa yeelay waxay nafteena iyo kuwa kale ka dhigi kartaa in ay dareemaan wanaag. Anigana sidoo kale waxaan u baahanahey waqti yar oo ee gaar ah. Waxaan jeclahay in aan kaligeey qoobka ka ciyaaro oo aan heeso! Mararka qaarna waxaan wici karaa saaxiibadey...”

“Laakiin, Ario, kawarran dadka guryahooda ka fog ama aan lahayn guri?” Sara ayaa weydisay.

“Taasi waa suaal wanaagsan”, Ario ayaa yiri. Ina keen aan soo raadinee.”





Waxay Sasha kudhaheen nabadgelyo iyago oo sii baxay mar kale. Hawada ayaa sii noqoneysay mid diiran markii ay ku si dagaayeen jasiirad ay bad ku weegaarsantahay.



Halkaasna waxay ku arkeen xero ay dad ka buuxaan. Hal gabar ayaa aragatay oogana haatisey meel fog.

“Hi Ario, aad ayaan ugu faraxsanahay inaan mar labaad ku arko! ayey ku dhawaaqday. Waxaan isku dayeynaa inaan ugu yaraan hal mitir kala fagaano, marka waxaan kaala hadli halkaan. Laakiin waxaan jeclaan lahaa inaan la kulmo saaxiibadaada! Magacaygu waa Leila.”

“Hi Leila! Anigu waxaan ahay Sara, kanina waa Salem,” Sara ayaa oogu warcilisay. Waxay u egtahay inaad isku deyeysid inaad naftaada ka ilaaliso fayraska corona. Maxaad kaloo samaynaysaa?”

“Waxaan gacmaheena ku dhaqanaa saabuun iyo biyo!” Leila ayaa oogu warcilisay.

“Miyaad sidoo kale ku qufacdaa xusulkaaga?” ayuu weyddiyay Salem.

“Mana tusi kartaa sida loo sameeyo? Leila ayaa oogu warcilisey. Markaas ayuu Salemna iyaga tusay.

“Waxaan dhamaanteen isku dayaynaa inaan noqono geesiyaal, laakiin wax ayaan ka walwalsanahay” ayay tiri Leila. “Idinka ma idin kala hadli karaa arintaa? Waxaan maqlay qof xanuunsaday oo geeriyooday taasi ayaa aad ii cabsi galisay. Ma runbaa dadku inay u dhiman karaan fayraska corona?”



Ario ayaa neefsaday kadibna ku fariistay salkiisii aadka u weynaa.

“Haa, halyeeyadeyda yaryarow, waa wax la yaab leh,” ayuu yiri Ario. Haba yaraatee, dadka qaar xanuun ma dareemaan, laakiin dadka qaarkood aad ayey u xanuunsadaan kuwana wey u geeriyoodaan. Taasi ayaa sabab u ah in aan dhamaanteen si gaar ah ooga taxadarno dadka da’da ah, iyo kuwa kale oo qaba cudurro kale, sababtoo ah waxey u badan yihiin in ay si dheeraad ah u xanuunsadaan. Mararka qaarkood hadii aan dareeno cabsi, ama ammaan la’aan, waxaa caawin kara in aan miskaxdeena ku sawirano meel ammaan ah. Ma dooneysaa in aad idinka ila tijaabisaan?”

Dhammaantood waxay yiraahdeen haa, sidaa darteed Ario wuxuu weydiyay carruurta inay indhahooda xiraan oo ay qiyaasaan meel ay ku dareemaan ammaan.

“Waxaad diirada saartaan xusuus ama mar aad badbaado dareentay,” ayuu yiri Ario.

Ka dib wuxuu weyddiyay waxa ay ku arki karaan, dareemi karaan, ama urrin karaan meeshoda amaanka ah. Wuxuu weyddiyay haddii uu jiro qof gaar ah oo ay jeclaan lahaayeen inay ku casumaan meelahooda amaanka ah iyo waxa ay ka wada hadli karaan.

“Waad aadi kartaa goobtaada ammaanka ah mar kasta oo aad dareento murugo ama cabsi,” ayuu yiri Ario. “Tani waa awoodaada sare, waxaadna la wadaagi kartaa saaxiibadaada iyo qoyskaaga. Xusuunow in aan anigu ku daryeelo iyo dad badan oo kale. Sidoo kale taasi way ku caawin.



Leila waxay tiri, "Kuligeen waan is daryeeli karnaa."

"Taasi waa sax, Leila," Ario ayaa yiri. "Meel kasta oo aan joogno waxaaan awoodi karnaa in qofba qofka kale uu daryeelo, ma jeclaan lahayd inaad noo raacdo safarkeena ugu dambeeya?"

Leila waxay go'aansatay inay la safarto Ario iyo saaxiibbadeeda cusub. Sara waxay ku faraxdey inay Leila ku soo biirtay ayaga maxaa yeelay waxay ogayd mararka qaarkood in aan u baahanahay inaan is taageerno. Waxay u duuleen si xasiloon, oo amuusan, laakiin Leila waxay ogeyd in saaxiibbadeeda cusub ay aad ayada u daryeelaan.




Buuro barafley ah ayaa si tartiib tartiib ah u soo muuqday, Ario ayaa kudegay magaalo yar. In yar oo caruur ah ayaa ku ciyaarayay togg agtiisa.

“Ario!” Midkood ayaa ku qayliyey, isagoo u haatinaya.

‘Hellow, Kim, ayuu yiri Ario, “Dhamaantiin, waxaan rabaa inaad la kulintaan qaar ka mid ah saaxiibbadeyda oo uu kudhacay fayraska corona, oo kana reysteen.”

“Sideey aheyd?” Salem ayaa weydiyay.

“Waan qufacaayay maraka qaarkood waxaan dareemay kulayl aad u daran. Sidoo kale, run ahaantii aad ayaan u daalanaa manna dooneynin inaan ciyaaro dhawr maalmood,” Kim ayaa yiri. “Laakiin inbadan baan hurday reerkeygana aad ayay ee daryeeleen. Qaar ka mid ah waalidkeen, ayeeyooyinkeen iyo awoowyadeen ayaa ku qasbanaadeen inay isbitaalka tagaan. Kalkaaliyaasha iyo dhakhaatiirta aad ayey oogu naxariisteen iyaga, bulshadaanada guriga ayey nagu caawiyeen. Dhawr toddobaad kadibna, caadi ayaan noqonay”



"Waxaan ahay Kim saaxiibkiisa," ayuu yiri mid ka mid ah carruurta. "Maadaama Kim uu kudhacay fayraska corona, ma aanan joojin saaxibtinimadeena - in kasta oo isaga aanan arki karin. Waligeey ma joojin inaan isaga daryeel u hayo, waxaana ku faraxsanahay inaan mar kale wada ciyaari karno!"

"Mararka qaar waxa ugu muhiimsan ee aan samayn karno inagoo saaxiiba ah waa in midba midka kale uu ilaaliyo." ayuu yiri Ario "Xitaa haddii taasi ay noqoto in midba midkeena kale uu ka kafogaado in muddo ah."



“Wax baan isku qaban karnaa dhexdeena”
Leila ayaa tiri.

“Maalin ayaan dhamaanteen waxaan awoodi doonnaa inaan ciyaarno oo aan ku laabanno iskuulka sidii aan ahaan jirnay oo kale,” ayuu yiri Salem.

Waxaa lagaaray xiligii la aadi lahaa guriga iyo xiligii Sara ay nabad galyo dhihi laheyd saaxibadeeda cusub. Waxay midba midka kale u ballanqaadeen in aysan waligood hilmaami doonin safarkii wacnaa ee ay wada qaateen.

Sara ayaa waxey ka murugootey in midba mida kale uusan arki doonin in muddo ah. Laakiin si fiican ayay dareentey markii ay xasuusatay wuxuu Kim saaxiibkiis yiri. Maadaama aadan arki karin dadka, micnaheedu ma aha in aad joojisey jaceylkooda.



Ario, ayaa wuxuu dhammaantood ku dajiyay guryahooda, inta uusan tagina waxa uu sugay ilaa ay Sara ka seexato.

“Berri ma sameyn karnaa sidan oo kale?” Sara ayaa asaga weydisay.

“Maya Sara, hada waa xiligii aad la joogi laheyd reerkiina,” ayuu yiri Ario.

“Xasuusnow sheekadeenii. Waxaad ku badbaadin kartaa kuwa aad jeceshahay in aad gacmahaaga dhaqdo oo aad guriga joogtid. Anigu marna kaama fogi. Had iyo jeer waad ila joogi kartaa markaad aado meeshaada ammaanka ah.”

“Halyaygeygu waa adi,” ayay hoos u tiri.

“Adigana sidoo kale waxaad tahay halyayadeyda, Sara. Waxaadna halyeyd u tahay kuwa ku jecel oo dhan,” ayuu yiri.



Sara ayaa hurdo la dhacdey maaliintii ku xigtay markey soo toostay, Ario ma joogin. Si ay isaga oo la hadasho waxey aaday meesheedii ammaanka, intaa ka dibna, waxay sawirtay wax kasta oo ay ku arkeen ama ku barten safarkoodi wacnaa. Waxay ku orodey hooyadeed ayadoo wado wixii ay sawirtay si ay oogu sheegto warkan.

“Dhamaanteen waan caawin karnaa dadka si ay u badbaadaan, hooyo,” ayay tiri. “Waxaan la kulmay halyeeyaal aad u badan inti aan ku guda jiray socdaalkeygii wacnaa!”

“Alla waa runtaa Sara!” ayay tiri hooyadeed. “Waxaa jira halyeeyaal aad u badan oo dadka ka badbaadinaya fayraska corona, sida dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ee cajiibka ah. Laakiin waxaad i xasuusisey in dhamaanteen maalin walba noqon karno halyeeyaal, halyeygeyga oogu weyna waa adiga.”

